

**Waxa lagaa yaabaa in aannu
awoodno in aannu kaa
gargaarno kiisaskan**

- Guri ka-saarid, dhibaatooyinka mulkiile/ kireyste, iyo guri aan ammaan ahayn
- Dhibaatooyinka lagala kulmo gargaarka dhaqaale (welfare) (TANF, gargaarka cuntada (food stamps), gargaarka guud, iwm.)
- Dhibaatooyinka cashuurta ee la xidhiidha IRS
- Budhcadnimada Qoyska Dhexdiisa
- Guri la-wareegista/Amaahda Arxanka daran
- Adeegyada iyo daboolka Medicaid, iyo helitaanka daryeel caafimaad
- Cashuur dhimista saboolka ee loogu talagalay mulkiileyaasha guri ee dakhligoodu hooseeyo
- Waxbarashada Khaaska ah
- Dhibaatooyinka Isticmaaleyaasha/Iibsadeyaasha
- Dhibaatooyinka la xidhiidha DHHS & taageerada ilmaha
- Tababarka shaqada /ASPIRE/PaS
- Dhibaatooyinka kale ee culus ee ah xeerka madaniga

Waannu ka xun nahay, kaama gargaari karno kiis ah xeerka ciqaabta ama jebinta xeerka wadada.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa gargaaro kiis ah xeerka qoyska (furis, xuquuqda waalidka), fadlan wac Volunteer Lawyers Project:

1-800-442-4293 or 774-4348



Rugtayada internetka waxa ku yaala war badan oo ah bilaash oo ku saabsan xuquuqda sharciga iyo aalabo caawi-naftaada.

www.ptla.org

Laybareeriyada iyo dugsiyada Maine waxay bixiyaan galitaan internet oo bilaash ah.

**Ma u Baahan
Tahay Gargaar
Sharci? Wac
Gargaarka
Sharciga ee Pine
Tree Legal
Assistance**



Gargaar sharci oo loogu talagalay dadka dakhligoodu hooseeyo ee jooga Maine.

www.ptla.org
www.helpmelaw.org

Gargaar Sharci oo Loogu Talogay Dadka Dakhligoodu Hooseeyo

Pine Tree Legal waxay gargaar sharci oo bilaash ah siisaa dadka dakhligoodu hooseeyo ee ku nool Maine. Adeegyadu ma laha kharash, laakiin waxa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad gargaar ka geysatid kharashyada maxkamadda.

Waxa laga yaabaa in aannu awoodno in aannu ku gargaarno haddii:

- Haddii dakhligaagu yahay am ka hooseeyo %125 heerka saboolnimada ee federalka, ama
- Aad tahay dhibane ay soo gaadhay budhcadnimo guriga ka dhacday.
- aannu ka xun nahay, gargaar kuma bixino jebinta xeerka wadada ama xeerka ciqaabta

Sababta oo ah shaqaalahayaga yar, ma gargaari karno qof kasta oo noo baahan. Fadlan la xidhiidh xafiiska Pine Tree ee kuugu dhow si aad u ogaatid haddii aannu ku gargaari karno.

“LAAKIIN TELEEFONADI- INU MARKASTA WAA MASHQUUL!”

Marmarka qaarkood waxa laga yaabaa inay dhib kugu noqoto inaad nagu heshid teleefonka. Waxa aannu rabnaa in aannu warkaaga maqalno, sidaa daraadeed fadlan sii wad isku-dayidda la-xidhiidhista.

Xafiisyada qaarkood waxa aannu ku isticmaalnaa hab sanduug fariimo (voicemail). Waxa laga yaabaa in taasi u muuqato soodhaweyn la'aan, laakiin waxay naga gargaartaa in aannu sii fiicneyno adeegga aannu bixino. Ka tag fariin waana aannu ku soo wici doonaa.

Teleefonadu waxay si gaar ah mashquul u yihiin maalmaha Isniinta iyo Jimcaha iyo subaxnimada hore. Sidaa daraadeed isku day inaad na soo wacdid wakhtiyo kala duwan. Ha sugin ilaa daqiiqada ugu dambaysa si aad noo soo wacdid sababta oo ah kedis!



Maxaa Dhici Doona Marka Aad Gargaar Weydiisatid Pine Tree Legal?

- ♦ Wac ama tag xafiiska kuugu dhow ee Pine Tree. Haddii aanad ku hadlin Ingiriisi, isla markiiba weydiiso turjubaan. **Waxa aannu ku siin doonaa turjubaan bilaash ah.**
- ♦ Si aannu u habsano in aad u qalantid gargaar, waxa aannu ku weydiin doonaa xoogaa su'aalo ah oo ku saabsan dakhligaaga iyo war shakhsi oo kale. **Pine Tree cidna uma sheegi doonto wax kugu saabsan adiga oo sidaa raba mooyaane.**
- ♦ Haddii aannu kuu banaanayn gargaarkayagu, isla markiiba waannu kuu sheegi doonaa.

Haddii uu kuu banaanaado gargaarka Pine Tree:

- ♦ Waxa aannu kaala talin doonaa sidii aad adiga naftaadu u xalin lahayd dhibaataada. Waxa kale oo laga yaabaa in aannu ku siino war qoraal ah oo ku saabsan xuquuqdaada sharci.
- ♦ Waxa laga yaabaa in aannu ku weydiisano in aad noo soo dirtid war dheeraad ah oo ku saabsan kiiskaaga. Waa aannu fiirin doonaa ka hor inta aanaanu kula kulmin markale si lagu siiyo talo dheeraad ah.
- ♦ Waxa laga yaabaa in aannu sameyno xoogaa ah cilmi-baadhis sharci ka hor inta aanaanu kula talin. Mar dambe ayaa aannu kula kulmi doonaa markale.

U hubso inaad fahamsan tahay waxa ay yihiin adeegyada aannu oggalaanay in aannu ku siino.

Na weydii su'aalo.

Qor magaca qofka ku gargaaraya.

Xusuusin qoro.

Haddii aad u baahan tahay gargaar dheeraad ah, markale na soo wac.

Halkee Baad Naga Heli Kartaa?

Soo wac mid kasta oo ka mid ah xafiisyadayada Isniin ilaa Jimce 8:30 subaxnimo ilaa 12:30 duhurnimo. Xafiisyada qaarkood waxay u furan yihiin wicitaanada ama adeeg ah “is-keenid” inta lagu jiro galabtii.

373 Main Street
Presque Isle, ME
764-4349

39 Green Street
Augusta, ME
622-4731

61 Main Street
Bangor, ME
942-8241

88 Federal Street
Portland, ME
774-8211

Suite #401
37 Park Street
Lewiston, ME
784-1558

Varney Bldg,
Rt. 1 & Old County Rd,
Machias, ME
255-8656

Farmworker and Native American Units
61 Main Street, Bangor, ME 1-800-879-7463

KIDS LEGAL: 1-866-624-7787 or 774-8246
Khadka ah dhawr luqadood: 774-8211

Macaamiisha ah Dhegoole ama Dhego Culus waxay isticmaali karaan adeegga gudbinta (ME Relay Service) ama Teleefonkayaga TTY ee Gobolka oo Dhan oo ah 828-2308

Noo soo sheeg haddii aad u baahan tahay turjubaan ASL si lagu gargaaro!



Laguuma diidi doono adeegyada ayada sababta oo ah qowmiyad, midab, lab iyo dhedig ahaan, nooc galmo, xaquido, asal wadan, da', diin, raacitaan ama rumeysnaan siyaasadeed, ama naafo.